

## **Caawinta bulsho ee magaalada St. Gallen: Caawinta Dhaqaale Ee Bulshada**

Qofkasta oo ku jira xaalad ku meel gaadh ah ama joogto ah oo degdega oo maaliyadeed oo aan awoodin inuu horumariyo xaalada wakhtigaasi ama dadaalkasta oo uu sameeyaba waxa xaq loo siiyey caawimo dhaqaale, iyadoo shardigu yahay in ay degan yihiin magaalada St. Gallen. Caawimada bulsho waxa loo xisaabiyaa gaar gaar xadiguna wuxuu ku xidhan yahay duruufaha shakhsiga, kharashka nolosha iyo heerarka dakhliga.

### **Codsiga/cadeynta xuquuqda cusub**

Isdiwaangalin cusub ama macluumaad guud oo ku saabsan waadixinta xuquuqdaada daryeelka bulsho, waa inaad shakhsiyani ugu timaadaa Qeybta Adeegyada Bulsho inta lagu jiro saacadaha shaqada (adigoon horey isku diwaan galin): Isniinta ilaa Khamiista, laga bilaabo 01:30 pm – 04:30 pm. Aqoonsi dhalasho oo shaqeynaya ayaa loogu baahan yahay diwaangalinaha cusub. Nidaam kale waxaa lagu sharxi doonaa wareysiga kooban ee shakhsiyani ka ah. Wareysiga waxaa lagu qaban doonaa Jarmalka.